

Tallaalka fayrasta koroonaha

– Nuvaxovid (Novavax)

Fayrasta koroonahu waxay keenta xanuun ku dhaca marinada hawada. Dad badan waxba ma dareemaan ama calaamado khafiif ah ayey dareemaan, laakiin dadka qaar ayaa si halis ah ugu xanuunsada. Dadka waayeelka ah iyo dadka qaba cudurrada qaarkood ayaa u sii nugal inay aad u xanuunsadaan ama geeriyoodaan. Tallaalku wuxuu qofka ka difaacayaa inuu si halis ah ugu xanuunsado cudurka koroonaha.

Yaa heli kara tallaalka koroonaha?

Dadka jooga Norway ayaa heli kara tallaalka koroonaha oo ka mid ah barnaamijka tallaalista ee qaranka. Tallaalku waa bilaash (lacag la'aan), waana ikhtiyaari.

Warbixin ku saabsan tallaalka ka aqriso bogga internetka degmadaada si aad u ogaato dadka la siinayo tallaalka, qaabka loo bixinayo tallaalka iyo xilliyada.

Qaabkan ayey tallaalistu u dhacaysaa

Tallaalka waxa lagu mudayaa cududda gacanta. Intaan lagu tallaalin waxa lagu weydiin doonaa inaad caafimaad qabto, iyo in falcelin (dhibaato) kaaga timi tallaalo hore oo aad qaadatay. Ha ilaawin inaad shaqaalaha goobta tallaalka u sheegtid haddii berri hore uu kugu dhacay cudurka koroonuhu ama aad hore u qaadatay tallaalka koroonaha, haddii aad uur leedahay, aad qabto xasaasiyad, isticmaasho dawooyin ama aad qabto dhibaatooyin caafimaad oo kale. Raac tilmaamaha ku saabsan tirada irbadaha tallaalka iyo wakhtiga u dhaxaynaya irbadaha tallaalka ee khuseeya dadka aad ka tirsan tahay. Arrintaa waxa kaa caawinaya dadka ka shaqaynaya goobta tallaalka. Waa muhiim in aad is-tallaalsho wakhtiga lagu qabtay. Waa wax caadi ah in tallaalka dib loo dhigo haddii xanuun degdeg ah ku yimaado qofka ama uu qabo xummad ka badan 38 digirii. Tallaalka ka dib waxa lagaa codsan doonaa inaad goobta tallaalka joogto ugu yaraan 20 daqiiqo.

Sidee tallaalkani u shaqeysaa?

Tallaalku waa tallaalka borotiin ku salaysan oo la isticmaalay teknoolojiyadaha tallaalka ee soo jireenka ah. Waxa ku jira nooc ah qodxaha caadiga ah (borotiinka spike) ee ku yaalla fayrasta koroonaha oo difaaca jidhku ku tababbaran karo. Waxa kale oo tallaalka ku jira maado kaaliye ah oo cusub oo gacan ka geysanaysa xoojinta falcelinta difaaca jidhka. Qaabkaas ayuu jidhku ku baranayaa aqoonsiga iyo iska difaacista fayrasta koroonaha ee runta ah haddii qofku uu qaado fayrasta. Tallaalku ma wato fayrus nool mana keeni karo infekshanka koroonaha. Tallaalka koroonuhu wuxuu samaynayaa ka hortag. Ma daweyn karo cudurka koroonaha oo qofku qabo.

Intee le'eg yahay waxtarka tallaalku?

Tallaalku wuxuu difaac ka yahay xanuunka daran ee ka imanaya fayrasta koroonaha. Tallaalladu si buuxda qofka ma uga difaacayaan in uu qaado ama dad kale sii qaadsiiyo fayrasta. Taas darteed waxa weli muhiim ah in lagu dhaqmo talooyinka ka hortagga is-qaadsiinta cudurka.

Waxyeelooyinka tallaalka

Inta badan waxyeelooyinku waxay yimaadaan maalmaha u horreeya ee ku xiga tallaalka. Inta badan waxyaalaha la isku arko waa kuwo khafiif ama dhexdhexaad ah oo maalmo ka dib qofka ka tegaya, laakiin dadka qaar waxa ku yimaada cilladdo ama dhib xoog weyn. Waxyeelooyinka ku yimaada dadka yaryar ayaa inta badan ka xoog weyn inta ku timaada dadka waaweyn. Waxyeelooyinka inta badan la dareemo waa meesha la muday oo xanuunta, daal, madax-xanuun, muruq iyo kalagoys-xanuun, in qofku dareemo inuu xanuunsanayo, lalabo iyo matag. Dadka qaar ayaa xummad ku dhacda, weliba inta badan markay qaataan irbadda labaad. Inta badan waxyeelooyinka irbadda labaad ayaa ka badan inta irbadda koowaad. Daraasadaha lagu sameeyay tallaalka ayaa muujiyay in Nuvaxovid keenayo waxyeelooyin ka khafiifsan oo ka muddo gaaban waxyeelooyinka tallaallada ku salaysan farsamada mRNA. Meesha lagama saari karo inay iman karaan waxyeelooyin dhif iyo naadir ah ama waxyeelooyin imanaya muddo dheer kadib.

Maxaan sameeyaa haddii waxyeelooyinku igu dhacaan?

Haddii aad isku aragto calaamado dhibaato oo aanad filayn, xoog weyn ama wakhti badan soconaya, waxaa wacan inaad la xiriirto dhakhtar ama shaqaale caafimaad kale si loo qiimeeyo xaaladaada una heshid talooyin. Arrintani kuma xidhna in aad is leedahay tallaalka ayaa dhibaataada u sabab ah iyo in kale. Shaqaalaha caafimaadka waxa ku waajib ah inay soo sheegaan cilladaha waaweyn ama falcelinnada aan hore loo arkin ee ay ka shakisan yihiin in sababtoodu tahay tallaalka. Adiguna farriin waad soo diri kartaa adiga oo isticmaalaya [helsenorge.no](https://www.helsenorge.no).

Tallaaladee ayaan qaatay?

Markaad qaadato tallaalka koroonaha waxa laga diiwaangelinayaa Diiwaanka Tallaallada Qaranka ee SYSVAK. Macluumaadka waxaad ka helaysaa [helsenorge.no](https://www.helsenorge.no)

Ma rabtaa faahfaahin?

Weydii dhakhtarkaaga, ama kuwa ku tallaalay ama shaqaalaha caafimaadka. Ama eeg bogga internetka ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha: <https://www.fhi.no/kvp>